



TUKWILA MUNICIPAL COURT

15005 Tukwila International Blvd., Tukwila, WA 98188
(206) 433-1840 Main Line (206) 433-7160 Fax

KIMBERLY A. WALDEN
Presiding Judge

LaTRICIA KINLOW
Court Administrator

Tukwila Municipal Court Policy on Immigration Enforcement in the Tukwila Justice Center

Maxkamada Dowlada Hoose Tukwila waxey dhaqangelisaa mabda'a ah in Maxkamadaha yihiin xarun furan oo cid walba soo geli karto, hadeey dacwad leeyihiin, hadey adeeg uga baahan yihiin, amaba hadey rabaan ineey dhegeystaan dacwad socota. Waa xeerka Maxkamada Dowlada Hoose Tukwila in dadka loo xirayo arrimo la xiriira sharciga ku joogida dalka (Immigration) laga qaban karin gudaha Maxkamada Dowlada Hoose Tukwila, marka kaliya oo qof loogu qaban karo ama loogu xiro karo arrimo la xiriira sharciga joogida wadanka (immigration) waa hadii gudoomiyaha Maxkamada Dowlada Hoose Tukwila amro arrintaas. Xeerkaan kama mamnuucayo ciidamada amaanka hadey qof u xirayaan arrimo la xiriira amniga oo degdeg ah, ama u xirayaan qof kadib markii maxkamada soo amarto. Intaan qof loo qaban dacwad madani ah aawgeed gudoomiyaha maaamulaya maxkamada waa inuu eegaa amarka fasaxaya qofkaas in la xiro, uuna hubiyo in amarkaas maxkamadeed yahay mid sharciga waafaqsan.

Iyadoo la eegayo sharciga maxkamadaha Washington State, General Rule 38 (GR 38) maxkamadaha oo u furan qof walba, **Cidna lama xiri karo intuu joogo maxkamada gudaheeda, dacwo madani ah awgeed ilaa maxkamada amarto arrintaan. Marka maxkamada la leeyahay waxaa ku jira sarta maxkamada ku taalo, parking lotka maxkamada, cowska ku ag yaal maxkamada, xafiisyada maxkamada, meelaha dadka maraan (side walk), iyo meesha laga soo galo ama baxo maxkamada.**

Iyadoo la eegayo sharciga Washington state RCW 2.28.330, **in dadka amaan ka helaan in la xiro dacwad madani ah awgeed intey u sii socdaan maxkamada, joogaan, ama ka soo laabanayaan maxkamada, ilaa in dhan 1 mile marka laga tago meesha maxkamada ku taalo.**

Iyadoo la eegayo Tukwila Municipal Code 2.98, fulinta sharciga federaalka wadanka lagu joogo, Federal Immigration Laws. **Shaqaalaha maxkamada Dowada Hoose Tukwila ma wareysan karaan dadka yimaada maxkamada xaaladooda sharciga wadanka lagu joogo (immigration), ama iney wadani yihiin iyo in kale. Mida kale shaqaalaha maxkamada ma qaadi karaan talaabo ay ku eegayaan ama ku hubinayaan sharciga wadanka ku jooga (immigration) qof yimid maxkamada.**